



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDW 187/2021

TR. 15/04/2021

UJJEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO IYO WAKAALAD.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 15/04/2021, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

- 1- **Cayndaruus Cabdi Aadan** Somali ah, Ku Dhashay Xamar, Sanadkii 1983, Ina Canab C/Ille Xuseen, oo sita W.A.L.ID.NO.MoCA009/Wasaarada Arimaha Dastuurka ee D.F.Soomaaliya
- 2- **Jaamac Shuuriye Maxamuud**, Somali ah, Ku Dhashay Bula-burte Sanadkii 1990, Ina Dahabo Waasuge Sheegow , oo sita W.A.L.ID.NO.04202601219939/Ciidanka Boliska Somaliyeed.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in ay geeriyootay Marxuumad la oran jiray **MARXUUMAD XALIIMO SHEEGOW CADDOW**, Kuna Geeriyootay Xamar Sanadkii 2010 labadeedii waalid iyo Saygeediina wey ka geeri horeyeen, hadda la joogana Waxay Ifka uga tagtay oo dhaxlaha 1 Wiil, iyo 1, gabar Waxayna kala yihiin:-

DADKA:-

- | | | | | | |
|-------------|----------|----------|-------------|---------------|----------------------|
| 1- Khadiijo | Maxamed | Maxamuud | Degan Xamar | Dhalatay 1960 | (Gabadhii Marxumada) |
| 2- C/laahi | Cabdulle | Xuseen | Degan Usa | Dhashay 1963 | (Wiilkii Marxuumada) |

Waxay kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in aysan jirin Cid kale oo Marxuumada dhaxleysa haday noqon laheyd Asal Ama Farac.

HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXUUMKA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUMAD XALIIMO SHEEGOW CADDOW** ay ifka uga tagtay Boos Banaan oo ku yaal xamar Degmada (Y/Shiid) Lehna **W.M.L.009931/2019 Tr.21/08/2019** Kana Soo Baxday Nootaayo Tawakal uuna Saxiixay Dr,Xuseen Maxamed Calasoow Cabirkiisuna dhan yahay (20X30)-M lotto.l.r. (0620-0622-M).

WAKAALAD

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In C/laahi Cabdulle Xuseen oo Dhaxaltooyada Ka mid ah uu Soo Wakiisheen **Salaado Xaashi Xuseen**, Sida Ku Cad **Wakaalad Gaar ah Ref NO. 602-1424, Tr.31/03/2021** Kana Soo Baxday HHMobile uuna Saxiixay Xuseen Yaasiin Xuseen, Waxaana Soo Wada Xaqiijiyey Wakaaladaan Wasaarada Arimaha Dibadda ee D.F.Soomaaliya iyo Maxkamada Racfaanka ee Gobolka Banaadir.

Sidoo kale **Khadiijo Maxamed Maxamuud** oo Dhaxaltooyada Ka Mid ah, Kuna Sugan Muqdisho Waxay Maxkamada Horteeda Ku Wakiilatay **Salaado Xaashi Xuseen**, Una soo wakiisheen dhamaantood in ay u maamuli karto, dhaxalkoob u samayn karto, gadi karto, Hibeyn Karto, Wareejin Karto, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karto, Maxkamadaha dalka hortooda u matali karto qof waliba qismiga uu ku leeyahay dhamaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen **MARXUUMAD XALIIMO SHEEGOW CADDOW**.



MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA

Cayndarus Cabdi Aadan



Jaamac Shuuriye Maxamuud



MASAWIRKA D-MAALKA

C/laahi Maxamuud Sheegow



MASAWIRKA WAKIILKA DHAXALTOOYADA

Salaado Xaashi Xuseen



MASAWIR QOF KA MID AH DHAXALTOOYADA

Khadiijo Maxamed Maxamuud



=DAMIINU MAAL=


- C/llaahi Maxamuud Sheegow, Wuxuu Maxkamadda Ka Hor Cadeeyey in uu Damiinul Maal Buuxa ka yahay, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Kuwii Dhabta ahaa, Masuul Buuxana uu Ka Yahay Wixii Ka Yimaada Wakaaladaha Sare Ku Xusan.

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1-) Cayndarus Cabdi Aadan



=SAXIIXA DAMIINU MAALKA=
C/llaahi Maxamuud Sheegow



2-) Jaamac Shuuriye Maxamuud



=SAXIIXA WAKIILKA DHAXALTOOYADDA =
Salaado Xaashi Xuseen



SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga Wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay Aragtay Dukumintiga Dhulka ee ay Marxuumada ku qoran tahay, Markay Aragtay Wakaaladaha sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida MARXUUMAD XALIIMO SHEEGOW CADDOW, oo ay dhaxalkeeda leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugeysaa in Salaado Xaashi Xuseen, ay Wakiil buuxa u tahay dhamaan dhaxaltooyadda isla markaana ay awood buuxda u leedahay ku tasarufka Hantida ay ka dhaxleen MARXUUMAD XALIIMO SHEEGOW CADDOW, ee sare ku xusan, Waana Sugitaan dhaxalkoob iyo wakaalado ansax ah waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi "Usabi"



GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

Dr. Axmed Maxamed Cali

